

Helitaanka Diinta ee Dadka Dhalinyarta ah

Ku Xidhnaanshaha Hawlaha Dhaqanka, Diinta, iyo Bulshada

Marka dadka dhalinyarta ahi ay ku xidhnaadaan hawlaha dhaqankooda, diintooda, iyo bulshadooda, waxay siisaa ku xidhnaanshe dadban oo qoyskooda ah, xataa marka ay ka maqan yihiin guriga qoyskooda ee ay ku sugan yihiin xarunta JR (Waaxda Cadaalada Maraykanka, 2012). Marka laga tago taageerada ay bixiso, Xoriyada bandhiga shakhsiyada iyo diintu waxa uu qayb ka yahay xuquuqda Xeerka Kowaad ee ruux kasta oo dhalinyar ah.



“Ma jirto qayb ka wayn shakhsiyadayda diintayda. Waxaa weeye qaybta ugu qoto dher naftaada, oo waxay isku xidhaa bulshadayda.”

- Sirta Ruuxa Dhalinyarta ee JR

Taageerada Ruuxa Dhalinyarta ah

JR waxya kala sii shaqayn doontaa bulshoon dimeedka xarumaheena si ay uga taageerto dadka dhalinyarta ah safarkooda diimeed, ruux ama dhaqan.

Noocyadee Nidaamyada Diinta ama Ruuxdiga ah?

Waxaa jira nooc walba bandhiga diinta, ruuxdiga, iyo dhaqanka shacabka JR oo dhan. Kuwa la garanayo ama sida caamka loosoo bandhigo waa:

- **Kiristanka, waxaa kamid ah:**
 - Borootestant
 - Kaatoolig
 - Jehovah's Witness
- **Yuhuud**
- **Messianic Jew**
- **Muslim**
- **Dhaqamo kale oo Maraykanka Dhaladka ah**

Sidee Ayay u Eeg Tahay?

Xarun kasta oo JR way ka muuqaal duwan tahay ta kale, iyo taageerada dadka yaryar ee ay u adeegaan. Qaar ayaa qabta kulamo isku imaatin ah iyo munaasabado dadka dhalinyarada ee xarunta, wada jir ah, ama Xarunta Bulshada. Xubnaha qaar bulshadu waxay yimaadaan xarunta JR, ama kaga qayb galaan maqal iyo muuqaal, si ay ugu xidhmaan oo ay ugu qabtaan adeegyada dadka dhalinyarta ah. Dadka dhalinyarta ah waxay isku imaan karaan si ay koox wax ugu wada akhristaan ama u qabsadaan munaasabad.

Dadka dadka Xarunta Bulshada, waxay qaban karaan kiniisada, misaajidka, sinikgooga, jaabelka, macbudka, xarunta bulshada, ama dhisme kale ama munaasabad u dhaw. Dhalinyarta Dhaladka Maraykanka ah waxay isku dayi karaan cibaadada sweat lodge. Dadka qaar dhalinyarta ahi way soomi karaan oo waxay cibaadaysan karaan wakhtiyada qaar sanadkii.

Ruux kastaa waxa uu xaq u leeyahay wixii diin ah sida buugta ruuxdiga, astaamaha siinta, saliga lagu tukado, xijaabta, iyo wixii kale ee shayo diin ah ee la ansixiyay.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Golaha Latalinta Dhalinyarta Green Hill

Dhawaan, Isku Duwaha Dugsiga Green Hill Terri Stewart hore u ahaa Golaha Latalinta Spiritual Ethical Religious Value (Mabaadii'da Anshaxa Diinta ee Ruuxdiga, SERV) ayaa kulmay si todobaadle ah. Dadka dhalinyarta ah waxay keenaan fikiro iyo talooyin ku saabsan sida loo balaadhin karo taageerada oo waxay samaynayaan jadwal maalmaha ciidaha iyo munaasabada.

Halkee Ayaan Ka Heli Karaa Macluumaad Dheeraad ah?

Hadii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan lasoo xidhiidh hogaanka xarunta si aad wax uga ogaato ikhtiyaarada laga heli karo ee xaruntaas. Waxaad sidoo kale iimeel ugu diri kartaa **DCYF.GHSReligiousCoordinator@dcyf.wa.gov** wixii fikiro dheeraad ah ee ku saabsan sida looga taageero karo dhalinyarta diintooda iyo baadhitaanka ruuxda iyo bandhiga.

Ma Doonaysaa Inaad Wakhtigaaga Ugu Deeqdo?

Waxa aanu marwalba doon doonaa dad ku deeqa wakhtigooda dhamaan qaybaha taageerada dadka dhalinyarta ah. JR waxaa ka go'an xaqiijinta in dadka dhalinyarta ahi ay helaan dhamaan nidaamyada diimeed iyo ruuxeed. La xidhiidh xarunta JR ee kuugu dhaw oo ogow qaabka.



Dadka dhalinyart ahi waxay diinta ku bartaan maqal iyo muuqaal iyada oo ay la joogaan dadka ku deeqay wakhtigu.

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, xaalada dhalasho ama soo geleyti, da'da, rabitaanka jinsiga ama aqoonsiga jinsiga, xaalada ciidanka hawlgabay ama ciidan, xaalada hooyada naas nuujinaysa, iyo jiritaanka laxaad la'aan jidh, dareen, ama maskaxeed ama isticmaalka ayda ama xayawaanka carbisan ee dadka haga. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhaha Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.